



Gaadiidka



Gaadiidka Dadweynaha



Gaadiidka dadweynaha waa sida dhaqaale ahaan ugu jaban oo loogu dhex socon karo magaalooyinka Australia ayadoon la qarashgarayn lacag saas u badan.



Magaalooyinka waaweyn oo kala duwan waxay leeyihiin noocyo gaadiid dadweyne sida:

- basas



- tareenada



- taraamyo



- huuriyo




Waxaad u baahan tahay inaad haysato tikidh markaad raacayso gaadiidka dadweynaha.



Magaalooyinka qaarkood waxay iibiyaan:

- tikidhyada la isticmaalo markii aad doonayso inaad socdaasho
- kaararka socdaalka oo aad ku shubato kareedhitka markaasna waxaad dulmarinaysaa markaad soo fuusho iyo markaad ka degayso gaadiidka dadweynaha

Noocyada Tikidhada




Keli ah

Loogu talagalay socdaal hal-waddo ah.

Soo-noqod ah

Waxaad u socdaali kartaa meeshaad doonayso inaad aado ka dibna aad ku soo noqoto guriga mar dambe.



Maalinle ah

Waxaad ugu socdaali kartaa meel kasta oo aad doonayso inaad aado maalintaas aad heshay tikidhkaaga.

9:00am – 3:00pm



Waqti aanay saxmadu jirin


Badiba dowlad-goboleedyada iyo taritooriyada waxay kuu ogol yihiin inaad ku socdaasho sicir hooseeya:

- inta u dhaxaysa 9am iyo 3pm
- ka dib 7pm Isniinta ilaa Jumcaha
- maalmaha weekend-ga iyo fasax-weynaha



Asbuuclaha

Waxaad u socdaali kartaa meel kasta oo aad doonayso inaad aado 7 beri laga bilaabo taariikhda aad gadatay tikidhka.




Billaha


Magaalooyinka qaarkood waxay kuu ogolaanayaan inaad gadato tikidho muddo dheer socda si aad u dhaqaalaysato lacagta.

Waxay iibiyaan tikidho ku e'g ilaa:

- 1 bil ah
- 3 bilood ah



- 6 bilood ah



- 12 bilood ah

Gaadiidka gaarka ah

Lahaanshaha iyo wadidda baabuurka




Waxaa laga yaabaa inaad gadato baabuur aad leedahay haddii aadan heli karin gaadiidka dadweynaha.



Lahaanshaha baabuurku waa waxtar waana fududyahay hase ahaatee waxay ku kacaysaa lacag badan.



Markii aad leedahay oo ku wadato baabuur Australia waxaa jira waxyaalo badan oo aad u baahan tahay inaad ka fiirsato.



Baabuurkaagu waa inuu ahaadaa mid:

- ka diiwaangashan haya'dda waddooyinka ee dowlad-goboleedyada iyo teritooriyada




- ka caysan shirkad caymis

Diiwaangelinta baabuurka



Waa inaad diiwaangelisaa baabuurkaaga sannad kasta si aad ugu wadato baabuurka waddooyinka.



Diiwaangelintaada waxay ka muuqataa lambarka taarikada oo ku dhegan afka hore iyo gadaalka dambe ee baabuurkaaga.



Waa wax sharci darro ah in la wado baabuur aan diiwaangashanayn.



Baabuurta booliiska waxay leeyihiin iskaan hubin kara haddii baabuurkaagu uu diiwaangashan yahay.

Caymiska



Baabuur kasta oo ka diiwaangashan Australia waa inuu ku jiraa Caymiska Qaybta Saddexaad oo Qasabka ah.



Waxaad u baahan tahay Caymiska Qaybta Saddexaad oo Qasabka ah haddii aad gasho shil baabuur oo ay cidi ku dhaawacanto.



Noocyada kale ee caymiska waxay kaa caawinayaan inaad bixiso wixii waxyeello ah oo dhacay haddii aad gasho shil baabuur.



Ayadoo ku xiran caymiska aad haysato, waxay kaa bixin karaan waxyeellada gaadha:

- baabuurkaaga
- cid kale baabuurkeeda
- hantida dadka kale leeyahay

Helidda laysanka darwalmimada



Si baabuur loogu wado Australia waa inaad leedahay laysanka darawalka Australia.

Weli waxaad u baahan tahay laysanka Australia xataa haddii aad haysato laysanka waddankaagii hooyo.



Waxaad u baahan tahay inaad samayso:

- imtixaanka xeerarka waddada
- imtixaanka darawalmimada




Waxaad kaloo u baahan tahay inaad samayso tababarka darawalmimada oo dheeraad ah.



Waa inaad kala xiriirtaa macluumaad dheeraad ah haya'dda waddooyinka ee dowlad-goboleedkaaga iyo taritorigaaga.



Waydii garwadeenkaaga ama qofkii ku isboonsaray si uu kuu caawiyo.



Waxaad kaloo u baahan tahay inaad laysanka darawalnimadaada aad kala timid waddankaagii hooyo lagu turjumo Ingiriisi.

Waxaad online-ka ka codsan kartaa in dokumantiyadaada la turjumo adoo ka eega <https://translating.dss.gov.au>

Wax qarash ah kuuguma kacayso.

Sidee baan ku heli karaa laysanka darawalnimada Australia?



Laysannada darawalka Australia waxaa ka masuula haya'dda waddooyinka ee dowlad-goboleedka iyo taritoriyada kasta

Sharciyada, xeerarka iyo xanibaadaha way u kala duwan yihiin dowlad-goboleed kasta.



La xiriir garwadeenkaaga ama qofkii ku isboonsaray markii aad diyaar u tahay inaad bilowdo barashada sida baabuurka loo wado.




Waxaad bilaabi doontaa wadida markaad hesho ruqsadda bartaha.

Waxaad keliya baabuur la-wadi kartaa darawal laysan leh ama tababare kugula jira baabuurka dhexdiisa.



Waxaad heli doontaa laysanka ku meelgaara markaad ku gudubto intixaanadaada.

Kadibna waxaad awoodi doontaa inaad adigu baabuurka wadato.



Dhowr sano kadib waxaad heli doontaa laysankaaga darawalka oo buuxa.

Waxaa jira xeerar kala duwan oo khuseeya nooc kasta oo laysan ah.

Waxyaalaha muhiimka ah in la xusuusto oo ku saabsan baabuur-wadidda




Ciqaabo ayaa jira haddii aad jebiso sharciga. Waxaana ka mid ah:

- ganaax – lagu saarayo lacag aad u badan



- in lagaa qaado laysankaaga



- muddo lagu xiro




Darawallada iyo rakaabka waa inay mar kasta xirtaan suunka kursiga. Waxaa u baahan sharciga.

Waxaa jira ciqaabo haddii aadan xiran suunka kursiga.



Carruurtuna waa inay:

- fariistaan kursiga dambe
- xirtaan suunka kursiga
- ku fariistaan kursiga baabuurka ee ilmaha oo ku habboon kaas oo ku habboon da'dooda



Hawadin baabuur aan diiwaangashanayn.



Hawadin adoon wadan laysan.

Mar kasta wado laysanka darawalnimadaada.



Haddii uu ku joojiyo sarkaal booliis, mar kasta si daacadnimo ah uga jawaab su'aalahooda.



Adeec dhammaan xeerarka waddooyinka iyo calaamadaha waddooyinka.



Waa sharci-darro in la haysto oo la adeegsado taleefanka moobaylka markii aad baabuur wadayso. Taasna waxaa ka mid ah:

- diridda ama qabashada wicitaannada taleefanka
- takis-garayn
- dheelidda cayaaraha
- qaadidda sawirada ama fidiyowga
- ka eegida waxyaalaha intarneedka

Boggan si ula kac ah ayaa loo baneeyey



Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka
ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee
Adeegyada Bulshada

